BARRO ABWAANADDA
CANAB GUULEED MAXAMED

Hooyooyinkiin baanu nahay
Haybadda lahaayee
Habka nolosha waxaa soo dhisa
Habarta weeyaane
Ubadkaanu haynaa
Ragga waanu hananaa
Hurdadaan ka toosnaa
Dhulkoo himsohiimso ah
Hugufkiyo xashiishkaan Gurnaa
Nagu halysaanee
Hantidaan dhaqnaa
Reer dhan baan hab u samaynaayee
Raggaa na hakradayee
Dumarku waa heerkii Nololeed

Hooyo Caasha Dacar,Sirta Guurka

Sebtember,2011
Mareegta Farshaxan

Xilli ku beegnayd 1922[kii] ayuu Yuusuf Maxamed Xirsi oo ku magac dheeraa Aw Yuusuf Barre tiriyey maanso uu ku magacaabey “Guur aan ka la’aado”.Wuxuu Aw Yuusuf Barre dardaarayey laba wiil oo isla reerka ahaa,xilligaana guurdoon ahaa.Sidaa darteed ayuu Aw Yuusuf Barre tilmaamay in ka badan tobaneeyo tilmaamood oo uu la beegsadey haweenka aan guur loola haweysaneyn.Waxaase sheegid mudan inuu maansada si qurux badan u dhigay oo uu dhalinyaradaa u sheegay tilmaamaha haweenka aanu guur la wadaageen isagu Aw Yuusuf Barre ahaan.Waxaanu hordhac uga dhigay dhaliilahaa tixahan:

- *Gaashgaashka waa lagu lumaa, gole ka fuulka ahe*
- *Ha gudoonsan waa kii caqligu, gaan kugu ahaaye*
- *Gurri-billa ninkii doonayee, nacaya goonbaarta*
- *Ee guur ujeedoow i maqal, waan ku garansiine*

Gabagabada ayuu Aw Yuusuf Barre si farshaxanimo ugu soo afmeeray dhawr tuduc haweenayda uu aqal la yagleeli lahaa,dhalinyaradana u cuntameysay inay gayaan u noqoto.Waxaanu Aw Yuusuf Barre yidhi:

- *Allow gaaridii loo xishiyo, gabadha loo aayo*
- *Raaliyo garaad badan midaan, iga guhaadaynin*

- *Adaan gacanta kuu hoorsadaye, ha i gafsiin caawa.*

Sida ku cad maansadaa iyo kuwo kale oo la halmaalaba may sheegin dhaliilaha ragga aan u qalmin inay haweenay dumar guur la wadaagto.Dhaqanka bulshada ku nool aduunka ayaa kaalmeynaya arintaa.Hab-dhaqanka reer Galbeedka oo guulo lagu hafiyo ayaa tiraba laba jeer qira jiritaanka haweenka: marka alaab la iibinayo lagu xayeysiinayo iyo markay jidhkooga loogayaan.Dhaqanka bulshada ku hadasha af-soomaliga ayaa weedh kaliya ku soo koobtay hagardaamada loola badheedhay haweenka “Wixii xunba Xaawaa leh”.

Reer kala tagey ayaa eedda dusha laga saaraa gabadha,loona raaciyaa “wixii lagu furay ayey qabtaa”.Laba gogol dhaafkoodii ilmo ka abuurmay ayaa ninkana guul iyo geesinimo lagu galadaa,gabadhana magacyo afku ka dhawrsanayo loogu wanqalaa. Halkay aheyd in labaduba danbiilayaal inay yihiin loo aqoonsado. Waa dunni nin rag ahi guusha uu isa siiyey,ceebna haween uu ku boqray.

Sidaa darteed ayuu Aw Yuusuf Barrena ku nuuxnuuxsadey galdaloolooyinka haweenka, ishana ka jeediyey dhaliilaha ragga.Waxaanu isdaba taxey tilmaamo tobaneeyo kor u dhaafey oo bilis xaawaley yeelatey kuna kaliftay inuu guur kaga la’aado.

Waxaase hiil iyo hooba ka gaystey qirista waxtarka haweenka iyo xusida siday mar walba haweenku waxyeelo u dabargooyaan dad dhawr ah oo uu ka mid yahay qoraagga caanka ah ee Cabdiraxmaan Faarax Barwaaqo.Taageeradiisaasi waxaa ka mid ah qoraal mug leh oo kaalin wax ku oola ka galay taariikhda u hiilinta haweenka.Qoraalkaasi qolka kaydka ee mareegta farshaxan ayuu soo galay muddo haatan laga joogo dhawr gu’. Qoraaggaasi qoraalkaa wuxuu ugu magac darey “BAAXADDA SUUGAANTA HAWEENKA SOOMAALIYEED KA WEYN WAX LA CABBUDHIYO OO CAGTA HOOSTEEDA LA GESHO”. Qoraalkani kuma soo bandhigayo uun aqoonyahanku kaalinta suugaaneed ee haweenka ee waxa kaluu inala wadaagayaa waxtarkay ay haweenku ka gaystaan nolosha horumarkeeda iyo waxyeelada ay had iyo jeer gufeeyaan.

Sidoo kale ayey gu’gii 1988[kii] Abwaanad Canab Guuleed Maxamed soo bandhigtay maanso lagu doogsaday, xagaldaacii dhaliilaha lamaanahana dheelitiraysa.Isla gu’gaas ayaa ururkii xornimada Somaliland u sabab noqdey ee SNM ay gacanta sare ku yeesheen maamuladii Hargeysa iyo Burco.Maydka Ciidamada maamulkii Afweynena rucub rucub iyagoo ah dhulka qarqiyeen.

Waxaa xilligaa haasaawe dhex maray Canab Guuleed iyo wiil gayaankeeda ahaa.Dusha kamuu muujin inta u qarsoon,iyaduna “waan kaa helay” kumay qancin.Sidaa darteed ayey Canab intaanay guri la yagleelin gayaankeedaa barasho la beegsatey.Barasho horteed ha i nicin ayey Canab golaha haasaawaha seeska ugu jeexday.Muddo gaaban ka dib ayaa Canab tilmaamo badan oo aanay guri kula dhisin wiilkaa u muuqdeen. Waxaanay

Canab go'aan ku gaadhey in tobaneeyo tilmaamood raggu yeesheen, sagaal ka mid ah ay diiday inay guri-billa u noqoto, midkii toosnaana uu noqon waayey guurdoonkani.

Maansada hiilka u noqotay haweenka,raggana caqli celin ugu filan ayey markaa Canab Guuleed curisay uguna wanqashey magaca "Qaybta Nolosha".Maansadani waa garnaqsi ay haweenku u soo jeedinayaan inan raggeedka qumanuhu qoorta ugu jiro.Sidoo kale waa maanso culayska bulshada ee dhan ka raran dhameystiraysa si galdaloolada ummada loo awdo.

Silsiladii Siiinley dhamaan maansooyinka ku jiray waxay ahaayeen jiifto,waxaase ladhayey laba Gabay oo ay laheyd haweenayda kaliya ee ka qayb qaadatey maansooyinkaa. Waa abwaanadii Caasha Jaamac Diiriye (IHUN). Haddaba bahda Mareegta Farshaxan ayaa barnaamijkeedii "Barro Abwaanka/adda" ku soo qaadaneysa bishan sooyaalkii nololeed iyo maanseed ee abwaanada Caasha Guuleed Maxamed "Ina Guuleed Wan-Weyn".

Agagaarka Oodweyne ee dalka Somaliland, waxaa aad loogu yaqaanaa dhaqashada xoolaha nool.Qiimeynta la siiyo qof waxaa qayb weyn ka qaata kaalinta uu ruuxaasi kaga jiro dhaqashada Xoolaha. Inkastoo xoolaha lagu dhaqdo degaankaa ay ugu mug weyn yihiin geellu,haddana waxaa soo raaca dhaqashada adhiga oo milgaheeda bulsheed leh.Guuleed Maxamed ayaa ka mid ahaa xool dhaqatada degaankaa. Guuleed wuxuu aad ugu baadisoocnaa dhaqaaleynta xoolihiisa oo had iyo jeer ka dhexmuuqan jiray xoolaha kale.

Guuleed Maxamed xeeldheeraanta uu u u lahaa dhaqashada xoolaha ayaa naaneys ahaan loogu bixiyey Guuleed Wan-Weyn. Waxa dhacday berri in wan weyn oo uu aad u dhaqaaleeyey laga siistay amma lagaga beddeshay shan sabeenood,waa sidaa waxa uu kula baxay (Guuleed Wan-weyn).Dhacdadaasi tilmaamnteeda gaarka ah ayey bulshada ku laheyd in Wan kuu gooyo tirada intaa leeg ee sabeenaha ah.

Sidoo kale ayaa Guuleed Maxamed wuxuu aad ugu xeeldheera,aqoon dheerna u lahaa aqoonta xidigiska.Aqoontani aad bay waxtar ugu laheyd reer miyiga.Aqoontani waxay kaalin fiican ka qaadan jirtay saadaalinta xilliyada barwaaqada iyo jiilaalka.Waxay fure u aheyd sahaminta dhulka daaqsinka ah ee xoolaha loo socdaalin karo.Waa aqoon mudan in la siiyo qoraaladeeda u gaarka ah.

Guuleed Maxamed tirinta maansada awood wuu u lahaa inkastoo aanu jeclayn.hase yeeshee hooyo Cibaado Faarax Qabille oo u dhaxdey Maxamed Guuleed waxay si laxaadleh uga qayb qaadatey curinta buraanburka.Xilli ku beegnayd 1968[kii] ayaa Guuleed Maxamed iyo Cibaado Faarax Qabille ay gabadhi ugu dhalatey Laan Mullaaxo oo ka tirsan Gobolka Oodweyne ee dalka Somaliland.Waxay labadaa waalid ugu wanqaleen gabadhaa inay ku caano maasho magaca Canab. Degaankaa Laan Mullaaxo ayey Canab Maxamed Guuleed ku barbaartey.

Degaanka Laan Mulaaxo waxaa aad loogu xasuusta in 1957[kii] markii xisbiyada salka ku haya reeraha aad loo furtay in laga furay Xisbigii la odhan jiray Xisbulah.Waxaa hogaanka xisbigan hayey furayna Sayid Axmed Sh.muuse(AL- Azhari).Xisbigani waa kii albaabada u furay in dad farabadani degaankaa kaga soo biiraan xisbigii SNL.Waxaa

kaloo meel u dhaw Laan Mulaaxo ku taala magaalada Gudubi oo laga dhisay barkadii ugu horeysay ee casri ah xilli ku beegnayd 1948[kii].

Magaalada Laan-Mulaaxo waxaa kaloo lagu xasuustaa heshiiskii ay beelaha degga degaankaas ku galeen xilligii gumaystaha Ingiriisku dalka maamulayey.Heshiiskaa qodobada ka soo baxey ee uu Sayid Axmed hogaanka u hayey waxaa ka mid ahaa : "In aanay beeshu isugu gurman xaqdaro iyo caddaawad sidoo kale in aanay dambiilaha ku dhiiri galin dambi oo aanay magan galin dhagar-qabe, nin dulmi falayna ugu kaalmayn dulmi".

Waa xeerarka u baahan in dhamaan beelaha dalka Somaliland dib u soo nooleeyaan,una dhaqan galiyaan. Beesha Ciise ayaa hiil la garab taagan "Xeerarka Ciisaha". Dhawaana waxaa buug ku qoray xeerarkaa qoraagga caanka ku ah dalalka Somaliland iyo Jibuuti ee Xaaji Cabdalla Xaaji Cusmaan Ceelleeya.

Sidoo kale waxaa magaalada Laan Mulaaxo lagu xasuustaa ka hadalka warqadii dhagarta ee uu qalinka ku duugey dadqalkii Hargeysa Morgan(Human butcher of Hargeysa). Warqaddaa waxaa afka Ingiriisiga ku afceliyey xeer yaqaan Maxamuud Sh.Axmed Muuse oo ahaa xeer ilaaliyihii guud ee dawladii Afweyne,hase yeeshee si cad uga soo horjeestay markay dawladaasi ka leexatey habkii dawladnimada.

Gu'gii 1981[kii] ,bishii April 6[dii] ayaa magaalada London lagaga dhawaaqey ururka xaq u dirirka ee SNM.Guushaa ka curatey cariga Ingiriisku waxay ibofur u noqotay inay maanta Somaliland ku naalooto nabbad iyo caano,beegsadaana horumar dhinac kasta ah. Isla gu'gaa ayey Canab Maxamed Guuleed u baqooshay magaalada Hargeysa ee dalka Somaliland.waxay Canab halkaa ka bilawday dugsigii Quraanka ,ka dibna u wareegtay ka mid noqoshada ardeyda dugsiga hoose/dhexe .

Xilligaa aanay Canab Guuleed galin malcaamad Quraanka ayaa loo tiriyaa inay curisay tixihii maanso ee ugu horeeyey.Qoyska ay ka soo jeedo Abwaanad Canab Guuleed ayaa garaadkeena u fuduaynaya inaynu si fudud u soo dhaweyno maansadeeda.Waa hibo Ilaahay ku maneystay qoyskaa oo tirinta maansada lagu yaqaaney,inkastoo ay hooyo Cibaado Faarax Qabille mudnaanta koowaad yeelaneyso.

Canab Guuleed ilaa yaraanteedii hibada maansadu way ka guuxaysay, hablaha qoyskoodu habeenkii marka ay ciyaarta u gudayaan way raaci jirta si ay u daawato ama ay u dhageysato heellada la is waydaarsanayo.Tixihii Maanso ee ugu horeeyey ayey Canab Guuleed ku sugaysay inay curin karto maanso iyadoon soo amaahaneyn erayada ay ka maqashey kooxda heellada tumanaysay.

Sababtii ay u tirisayna waxay ahayd, iyadoo la joogo goob aroos ayaa dhallinyaradii goobta joogtay mid iyo maanso soo daayeen, dabadeed Canab oo goobta joogtay baa tidhi anaa hadhay, markaasaa Canab sacab lagu soo dhaweeyey,iyadoo la dhawrayo inanta yari waxay la shir iman doonto. Waxay maansadaa ka mid ahaa tixahan :

Ereyadii horuu baxay
Kuma ag wareegee
Amba wayska alliftaa

Canab Guuleed muddo dabadeed ayey go'aansatey inay safar dheer gasho,kuna gaalaa bixisay ilaa Caasimada Jabuuti ee dalka Jamhuuriyada Jabuuti.Mudadani Canab Guuleed waxaa aad uga guuxayey maankeeda heesihii ay maqli jirtay gaar ahaan hees hawleeddadii, dhaqankii iyo noloshii miyigeenna.Waxaa aad loo jeclaa dhageysiga markay Canab ka sheekaynayso dhaqankaa iyo maansooyinkii ku xeernaa.

Maansadi ugu horeysay ee ay Canab Guuleed Maxamed tirisay hanaqaadan waxaa lagu tiryaa maansada "Kala irdhow".Maalin maalmaha ka mid ah ayaa Canab Guuleed heshay dhambaal fariimeed canaan iyo eed dusha ka saaraya.Dhambaalkaasi wuxuu ka yimid gabadh ay Canab Guuleed ay aad u saaxiib ahaayeen una digo rogatey magaalada Riyaad ee cariga Sucuudi Carabiya.Canab Guuleed ayaa dhambaalkaa kaga warcelisay maanso ay tixaheega ku muujinaysay in qof walba hawli la soo gudboonaatey mashquulisay, aanayse jirin is-ilawsho ama xidhiidh go' sida ay sheegtay saaxiibadeed.Waxaa maansadaa ka mid ahaa tixdan:

Wakhtigii adkaadaa dad buu, kala irdheeyaaye

Gu'gii 1988[kii] ayaa Canab Guuleed gayaankeed soo calmadey,doonayna inuu u soo geed fadhiisto.Waxaa xilligan suurtogashey inay Canab haasaawe la qaadey wiil guurdoon ah,hase yeeshee waxay aad uga feejignayd haye fudud.Waxay Canab Guuleed aad u dareensaneyd in guri si fudud ku dhismaa burburkiisuna qaadaneyn muddo dheer. Sidaa darteed ayey muddo gaaban ku ogaatey tilmaamo dhawr ah oo ninkani lahaa aan kaalmeynayna in ay oorri u noqoto,guriguna sidaa ku dhismi karo.Canab Guuleed xillgaas ayey curisay maanso ay ugu wanqashey magaca "Qaybta nolosha". Maansadani waxay tusaale u tahay dumar farabadan oo si fudud ugu dhaca dabinada shabeel-naagoodka,sidoo kalena waxay caqli celin u tahay rag badan oo godob ula badheedha haweenka.Waxaana ka mid ahaa maansadaa :

Adduun waa qisiyo yaab, quusayoon gudhine
Marna waa qaflado iyo naxdino, qaawan abidkoode
Qorraxdii dhacdiyo waagu, way kala qalloocdaane
Qosolka iyo farxadeheedu wa, qaaban soconayne
Marna waa qabow iyo nimcado, laysku qoofalaye
Qof waliba wixii loo qoruu, qayb u helayaaye

Gabaygan ay ku ladhan tahay xigmadda badani ee ay Canab tirisay waa mid ka hadlaya aaya-ka-talinta nolosheeda.Si gaar ah gabaygu wuxuu u tilmaamayaa ruuxa ay haboon tahay Canab ama haweenkuba inay la wadaagaan nolosha. Muddo yar gudahood ayaa Canab waxay ogaatay wiilkan ay guurka isla ogolaayeen inuu leeyahay tilmaamo aan haboonayn oo ay aad iyo aad uga biyo-diidday.Sidaa darteed ayey si cad oon gabasho laheyn aayaheeda ugu talisay.Canab waxay gayaankeediina farta ka saartey diidmo qayaxan oo u farshaxaneysan qaab maanseed.Waxaa maansadaa "Qaybta Nolosha" ka mid ahaa tixahan si qayaxan u sugayey diidmadeeda:

Qiimo ma laha barashadu haddaan, lays qaddarinayne
Qalbigaan la dhawreyni dhaqsuu, qanac u gaadhaaye
Qayrkaa haddaan kuu jeclaa, waan ku qoonsadaye
Ka qawedeyna qoyskaan lahaa, aysla qabataane
Qormadaan yagleelaayey oo, qiimo gelinaayey
Qaban qaabadii aan watiyo, qaradkii beenoowye

Waxay markaa Canab gudagaleysaa inay tilmaanto sagaal tilmaamood oo ay iyadu ama haweenku gabi ahaanba u cuntameyn inay guri kula yagleelaan ragga gayaankooda ah.Waxaanay Canab Guuleed maansadaa ku sheegtay inay haboon tahay in aan nafna loo qatalin qoys dhisitaankii,kol haddii ifafaalaha dumista gurigu muuqato.Iyadoo Canab arintaa cabiraysana waxay tidhi:

Qosolkiyo sasabadaad waddaa, ka qoto dheer xaale
Qof liita illayn lagu hodaa, qaladkan ii dhaafe
Haddaad qaafil ii haystana, dhowr qarnaan jiraye
Sharaftaydii anigoo qabaan, qooni igu oollin
Oo aan qal qaalina u socon, qubinna diintayda
Naftoon qisaasaa waa midaan, meesha qabanayne

Maansadaasi may qancin wiilkii,inkastoo aanay Canab ka soo noqon go'aankaa diidmada ah ee ay aad uga fiirsatey.Hase yeeshee Canab oo og inay guur diyaar u tahay ayey maansadaa ku soo gabagabeysay tilmaanta ay Illaahay ka bariday inuu u yeelo Ninka ay guur la wadaageyso,iyadoo waliba tilmaantay sagaal tilmaamood oo ragga ku sifooba aanay marnaba guri la yagleelayn.Waxaanay Canab Guuleed ku afmeertay maansadeeda tilmaanta wanaagsan ee ay la rabto gayaankeedu inuu yeesho,waxaanay tidhi:

Allahayow adaa qaaddiroo, qaybshay dunidaase
Adigaa quruumaha ku nool, quudshey keligaaye
Qalbiyada adaa daalacdoon, qodob ku seegayne
Geesi qiimo weyn lagu ogyoo, qayrkiba u haysta
Soddonkii quraankiina ay, qabatay laabtiisu
Oon qallayn salaadana siduu, Caadil ugu qeexay
Qaxar iyo dhibaatiyo midaan, qaladba ii geysan
Qarki aad ka eegtaba midaan, meela laga qoonsan

Kaasuu qalbigu doortay oon, qaadan kari laaye
Qaaddirow Allaahow isii ways, qaddarin layne

Xilli ku beegnayd 1993[kii] ayaa waxaa magaalada Jabuuti ku soo noqtay gabadh ay aad Canab u saaxiib ahaayeen ,sidoo kalena qaraabo guud ahaayeen.Canab waxaa markaa la gudboonaadey inay gacan qabato gabadhan.Canab Guuleed waxay gabadhaasi dajisay gurigii ay deganaayeen iyada iyo hablo kaleba.Muddo markii ay gabadhii joogtay ayaa dhibaato hor lihi kala dhex mareen gabadhii iyo hablihi kale.Canab Guuleed dardaaran iyo wax sheeg ayey gabadhii ula jeedsatey,hase yeeshee gabadhii oo dareensan inaan baahidii hore haynee ay iminka isdabari karto ayaa Canab lafteeda isku raacisay dirir iyo aflagaado lama filaan ah.Canab waxay arintaasi ku noqotay ku soo booddo.

Canab markaa ayey curisay maansada la yidhaa "MUUQAALKA BARASHADA". Maanasadani waxay Canab kaga warameysaa in barashadu qaadato muddo ,una baahan tahay in jiddiin la wada cunno ama jid la wada maro.Waxaanay maansadu si qoto-dheer uga warameysaa inaan muuqa guud iyo maryaha laysku qiimeyn kareyn.Waxaany tidhi :

Muuqaalka barashada haddaan, maanka ka asteeyo
Maryuhuu dadkani wada sitaa, midabka guudkaase
Muuq lagu gartiyo show malaha, muunad gooni ahe
Mid waliba wuxuu yahay runtii, mawlahaa garane
Jeerood minan ku kulantaan dadow, barasho waa mooge

Markay maansadaa Canab Guulled ku sheegtay in barashadu waqtigeeda u baahan tahay, ayey farta qaniinyada kula boobeysaa iyadoo xasuusaneysa maalintii ay magan galisay gabadhaa oo hali-seegtay,waxaaney tidhi:

Mabda'yga gaarka ah haddaan, miimka ka caddeeyo
Hubsiimadu mudday leedahoo, loo miyiriyaaye
Madh-fudayd malkuu kaa ridaa, aan macna lahayne
Maalintaan ku soo doontay baan, magane hiifaaye

Dusha sare mullaax baad ahayd, mudan haweenaade
Imikaanse maad iyo u dhacay, mahadha joogta ahe
Jeerood minan ku kulantaan dadaw, barasho waa mooge

Muddo dheer ayaan waxan ahayn, laba mataanoode
Inkastoon milgaha toosan iyo, marinka kuu sheego
Amma aan mastuur iyo asluub, hadal macaaneeyo
Maahmaah dhaxal gala ah haddaan, maandhey kuu tebiyey
Adiguna waxaad maaggantaa, kuu muraayad ahe

Illayn macangag ruuxii ah baan, maara loo heline
Miyuu hadal ku marayaa cidlaad, muran la joogtaaye
Jeerood minan ku kulantaan dadaw, barasho waa mooge

Markay u caqlicelintii dhameysay Canab Guuleed ayey soo bandhigaysaa inaan dagaal iyo aflagaado la iswaydaarsado guul lagu gaadheyn.Waxaanay ku soo afmeeraysaa Canab Guuleed in had iyo jeer ay haboon tahay in la kala roonaado oo hadalka wanaagsan la gargaarsado.Sidoo kale waxay Canab soo bandhigaysaa in haddii la kala ficil qaato dhibtoo sii badata mooyee ,ay guuli durugsan tahay,waxaanay tidhi:

Haddii aan masawnoo xumaan, laysu miisaamo
Maqal iyo hadduu arag lumoo,laysu muruq sheegto
Midkeen bay maddiiluhu ku dhici, miiska saaraniye
Masiibadu intay kaa fogtaa, la iska moosaaye
Aniguna haddaan miinsadoo, aan masalo raaco
Mu'min iyo ninkii samir lahaa, baa macaash badane
Samaan baan miciinsaday Allaha, Maaligaa jira e
Jeerood minan ku kulantaan dadaw, barasho waa mooge

Gu'gii 2002[kii] ayaa Canab Guuleed barasho gundhigeedu ahaa guur ay la wadaagtey saygeeda Ilaahay iminka isku calfey. Canab Guuleed waxay ka dareentay gayaankeegaasi inaanu hawshan dhiniciisa ka taageerayn,siday ugu hawlan tahayna aanu ugu madax banaaneyn.Markaa ayey ayey curisay maanso hoge-tusaaleyn ah oo dhawr qaybood u qaybsan.Waxaanay maansadaa Canab Guuleed ugu wanqashey "Wax Garad". Waxay Canab ku bilawday maansadaa duco,waxaanay tidhi :

Mid wanaagsanoo Waalid iyo walaal
Abti waa wadnee Wacanow adeer
Wehel toosanoo Wahsan ii noqdoo
Weedhaan idhaa Waydayninoo
Alla waaniyaan Weynaha Ilaah
Waydiistayoo Weli waan sugaa

Dabadeedna waxay Canab Guuleed maansadaa "Wax Garad" ku sheegaysaa halkey ka taagan tahay arinta guurka,iyadoo xusaysa siday u argato hakadka ka muuqda gayaankeeda ay haasaawaha la wado oo u sheegay in culays badani ka saaran yahay

dhinacan Jabuuti,ayna haboon tahay inay magaalada Hargeysa ee dalka Somaliland ku aqal-galaan.Waxaanay Canab tidhi:

Waxaan talo ku dayn
Waagaan hubsado
Kaan weedhayee
Wakhti iiga lumay
Wiilyahow inuu
Warsan adiga yahay
Adigana war maqan
Walaac kaaga jirin
Waxaan anigu ahay

Waxay Canab Guuleed ku soo afmeeraysaa maansadaa heerka ay nolosha saygeeda ka gali laheyd iyo kaalinta ay buuxin laheyd haddii Ilaahay hawshooda siday doonayaan u dhameeyo,waxaanay tidhi:

Isma-weydo aan
Waaxidkana cuskada
Intoon wada jirroon
Isku waafaqnaan
Ku wadaagi layn
Weedho faraxleh baan
Waagii baryana
Ku waraabin laa
Weedh faraxleh baan

Weligood isnicin
Maba wiiqantee
Wadnayaal isjecel
Weel qudha kalgacal
Wakhtigii kastaba
Kugu waanin laa
Werdi iyo ducaan
Wakhtigaad baxdana
Kugu sii waddici

Gu'gii 2003[kii] bishii Julaay ayaa arooska Qoraaga caanka ah ee Xaaji Cabdalla Xaaji Cusmaan Ceeleeye iyo abwaanadda Canab Guuleed Maxamed ka dhacey magaalada Hargeysa ee cariga Somaliland.Waxay aheyd madal la isku arkay oo ay ilyartu isqabsatey.Arooskaasi si qurux badan oo mudnaantiisa laheyd ayuu uga dhacey magaalada Hargeysa,waanay raaligalisay arooska iyo aroosadaba.Siduu u dhacey iyo siday ilaa iminka u wada nool yihiin waxay muujinaysaa in Ilaahay ducadaa ka aqbalay.Ilaahayna si iyo si ka fiican ha ugu wado –Aamiin –Aamiin-Aamiin.

Nolosha baadiyaha ayaa tilmaanteeda gaarka ah ku leh xusuusta Canab Guuleed Maxamed.Waa dareen hagaya qaab nololeedka bulshada,waana sugida dhaqanka soo jireenka ee ay ummada reer Somaliland ku faanto.Dhaqankaas ayaa saameyn ku leh degaanka,duunyada iyo dadkaba.

Gu'gii 2008[kii] ayey Canab Guuleed Maxamed u socdaashey degaanka Ismaaciil Diiriye oo ka tirsan gobolka Oodweyne.Dhulkaasi waa deegaankii ay Canab ku dhalatay kuna barbaartay.Canab intii ay socdaalka ku jirtay waxay indhaheeda ku aragtay dhaqan guur ku dhacay dadka, duunyada,deegaanka iyo qalabkii reer guuraga Soomaalidu adeegsan jireen.Waxaa markaa Canab Guuleed isku qaban waayey muuqaalkii maankeega dhex mushaaxayey iyo muuqaalkan indhuhu ku dhaceen.Waxay isla xilligaa Canab Guuleed tirisay maansada "Dhaqan-Goob".

Waa maanso ay Canab Guuleed kaga hadlayso arrimahaa murugada leh ee ay aragtay intay socdaalka ku jirtay.Inkastoo dadkii degaankaa joogay aanay la qabin badankoodu fikirkan,Canab Guuleed waxaa u muuqday in dhalan-rogad saameeyey dad iyo duunyaba. Sidaa darteed ayey maansadan "Dhaqan-Goob" maskaxdeeda ka soo maaxatay maalmahaa ay Canab Guuleed socdaalkaa ku jirtay.

Magaalada Hargeysa ayaa xaggaa kasta waxaa ka dhaca barnaamij si qurux badan loo soo agaasimay oo iskugu jira bandhiga suugaanta iyo Buugaagta.Waxaa loo igmadey hawshan si akhriskana loo xoojiyo,taageero laxaad lehna loogu fidiyo suugaanta bulshada.Waxaa amaanteeda leh kolay labada hormood ee ururada Redsea-Online iyo Kayd ee Jaamac Muuse Jaamac iyo Ayaan Maxamuud Cashuur siday u kala horeeyaan.Canab Guuleed Maxamed ayaa ka mid ah dadka sida joogtada ah ugu xidhan barnaamijkaas.Sidaa darteed ayey Canab Guuleed Maxamed maansadeedii "Dhaqan-Goob" ku soo bandhigtay gu'gii 2010[kii] goobtaas. Maalintan ayaa ku beegnayd maalintii loo qorsheeyey suugaanta haweenka.Runtii dadkii halkaa joogay waxay maansadaasi u noqotay baraarujin iyo wacyigalin loo baahnaa aadna loo tabayey.

Canab Guuleed waxay maansada u soo bandhigtay qaabka loo yaqaan "qofeynta".Waa humaag ka mid ah humaagyada maansada lehna quruxdiisa gaarka ah.Waa dadkii, duunyadii, iyo degaankii oo si toos ah fariin ugu dhiibaya Canab si ay qaylodhaanta ugu gudbiso bulshada inteeda kale.Waxaanay maansadu ku bilaabmeysaa:

Ga'da gabay haddaan gacalkayow, guudka ka higgaadsho
Gilgishaye haddaan soo gambiyo, waxaan la guuxaayo
Gobo' runa haddaan sheego oon, gole ka faalleeyo
Garawshiiyo maan heli tolow, garasho waa yaabe

Anoo galab carraabaaya oo, beesha yara gaadhay
Gadaashaa dambaa layga yidhi, gacalo soo jooge
Goortii aan dayey dhaqankii baa, gacanta ii haadshay
Iguhaadiyoo wuxuu i yidhi, ereyo gaagaaban
Goobteed ku hoyataan ku idhi, waan guntanayaaye

Wuxu yidhi go'doon baan ku jirey, goor iyo ayaane

Wuxu yidhi warmaa laygu ganay, aanan geyahayne
Wuxu yidhi anoo geydh qabaan, meel galluubnahaye
Wuxu yidhi dadaw ii gurmada, goosan baan ahaye

Maansadu waxay waqti ku filan siinaysaa dhamaan inta dhaqanguurtay si ay cabashadooda u sheegtaan,waxaanay maansadu si qurux badan oo farshaxanimo dheeraad ahi ku dheehan tahay inoola wadaageysaa dhibta jirta iyo sida aynu Ilma Aadan hagardaamo wadayaal u nahay.Waxaa maansadu ku soo afjarmaysaa duco dhibanayaashu Illahay baryayaaan in dhibta iyo hantaaqadan lala dul joogo uu Illaahay ka badbaadiyo.Waxaanay tidhi maansadu:

Allahayow gacmaha hoorsannee,barako aan guurin
Noo geli daruuraha giblanee, guudka naga maydha
Gu' onkoday xareed galacle iyo, rays gabbala yeesha
Oon gufaaco xoogliyo lahayn, gaydh wax naga laysa
Guullow Allahayow na sii, gacani waa taaye
Guntimaha isdhaafiyo Allow, garawgu noo beermo
Gasiinkana Allow nooga yeel, midhaha gaaxdooda
Oo maalka naga gudhan Allow, godol ku soo jooji,
Aamiin Aamiin Aamiin Aamiin

Canab Guuleed Maxamed ayaa ka mid ah goobjoogayasha Bandhiga Suugaanta iyo Buugaagta ee xaggaa kasta lagu qabto magaalo madaxda Hargeysa ee cariga Somaliland. Canab Guuleed ayaa hadyad ahaan gu'gan 2011[dii] u geysay maanso ay ku boqrayso adeegsiga qalinka iyo qoraaleyda. Waxay Canab Guuleed maansadaa u bixisay "Baal Dahab". Waxay maansadu ku bilaabmeysaa Magaca Illaahay iyo xuska madasha loo boholyoobey,waxaanay tidhi:

Bilawgiiba furaheenna waa, lagu badbaadshaaye
Baal kama maraynoo belaa, lagu xijaabaaye
Bismillaahi barakada Allaa, barada noo taalle
Isusoo boqoollaye dadow, barashadii waarta

Baxnaanada waxaan dhawri jirey, haatan beegsadaye
Barbaartii dalkeennoo sidaa, gole u soo buuxshay
Baahidana waxay tabanayeen, beledka loo keenay
Bandhig, buuggan loo baratan yahay, baaq isugu yeedhay
Waa wax lagu badhaadhoo qalbigu, nagu bogsoodaaye

Abwaanad Canab Guuleed waxay degan tahay magaalada Hargeysa ee dalka Soomaliland, waxaanay u dhaxdey qoraaga Xaaji Cabdalla Xaaji Cusmaan Ceelleeye.

Xaaji Cabdalla waa qoraga buuga “xeer Ciise.Waxaa kaloo Xaaji Cabdalla uu qoray qoraalo badan oo dhinaca suugaanta,dhaqanka,taariikh nololeedyadii abwaano dhawr ah,iwm. Waxaan ku soo afjareynaa qoraalkan aanu ku soo bandhignay maansooyinkii iyo sooyaalkii abwaanad Canab Guuleed Maxamed waanadii ay reerkeeda iyo reer kastoo dhisan ay ku waanisay:

Isma-weydo aan

Weligood isnicin

Waaxidkana cuskada

Maba wiiqantee

Wargalin:

Si aad u akhrisato maansooyinka Abwaanadda Canab Guuleed Maxamed oo dhameystiran,booqo eddegga loo waabey kooxda loogu magac darey “Gabayaa Danbe”.

Tixraac:

-Qolka Kaydka ee Mareegta Farshaxan

-Mareegta Doollo.

-Buugga Sirta Guurka (Xasan Cabdi Madar)

-Wareysi Canab Guuleed Maxamed
Wareysi qaade: Xaaji Cabdalla Xaaji Cusmaan

Qalinkii iyo Tifatirkii :
Fu’aad Sheekh Abuubaker
Bahda Mareegaha Farshaxan
www.farshaxan.com iyo www.farshaxan.org